


Caawimaada la siinayo waalidiinta caruurta ay haysato caqabadaha la "xiriirta caafimaadka dhimirku waxay u sahashaa inay hore u socdaan



Yaanu nahay

Waxaanu nahay urur aan faa'iido doon ahayn oo caawiya qoowsaska iyo waalidiinta haysta caruurta da'doodu u dhaxaysa ilmo yar ilaa 25 jir oo ay la soo daristo xanuunada maskaxda ku dhaca. Waxaan nahay waalidiin ka caawiyay caruurtooda duruufaha noocan ah- waanu soo marnay, waanu fahmaynaa, waanan ku caawin karnaa.

Isdhexgalka shaqadayada waxaa kamid ah:

Khadka caawinta waalidka iyo hagiidda nidaamka xanuunada maskaxda, helidda waxtarka bulshada iyo inaad hesho cid aad la sheekaysato markaad u baahantay.

Ururada waalidiinta caawiya si ay waalidiintu ula qaybsadaa macluumaadkooda, sidii midba midka kale u baranlaha, iyo sidii bulshadu isu dhexgelilahayd.

Adeegga hal-halka qof si loo siiyo taagero xooggan iyo higid uu kaga baxikaro duruufaha haysta wakhtigaa haddii ay noqonlahayd keli ahaan iyo haddii ay noqonlahayd bulsho ahaan intaba

Waalidiintii isticmaalay adeegyada aan bixino waxay noo sheegaan in ay ka heleen faa'iidooyin dharaada, oo ay ku caawinkaraan caruurtooda lana qabsadeen duruufihii ka horyimid. Waxa kaloo ay noo sheegeen in ay dareemayaan walwal, walaac iyo keli aan badnayn.

In si toos ah loola shaqeeyo qoowsaska waxa dheer in nidaam wanaagsan loo sameeyo si loo abuurto waxtar fiican oo ah habka qoowska loogu talagalay daryeelka caafimaadka maskaxda. Iyadoo loo adeegsanayo wada shaqaynta adeeg bixiyayaasha iyo kuwa daneeya waxyaabaha muhiimka ah, waxaanu hubnaa in baahida kumanaan qoys aanu fahanay waxna la qabanay.

Waanu agnahay marka hore in waalidku ka ciyaaro door muhiim ah nolasha ilmaha, cilmi-baadhistuna waxay taageeraysaa arintan. Waxaanu aqoonsanay in waalidku aanu keligii ka dabaalankarin. Waxaanu fahansanay caqabadaha iyo walwalka haysta qoowsaska. Waxa kaloo aanu rumaysanay in qoowsaska la kulma xanuunnada maskaxdu ay ka gudbikaraan caqabadaha jira.

Sideen kuu caawinkarnaa

In aanu fahano waxa ku saabsan ilmahaaga calaamadihiisa ama xanuunkiisa

In aanu ilmahaaga iyo qoskaaga u helno kaalmo iyo taageero

In aanu hagaajino adeegyada ilmahaaga ee guriga, dugsigga iyo bulshada dhexdeeda

In aanu siino taageero iyo xaaladaha lagula qabsanaayo niyad jabka nolosha la soo darsa

In aanu idinla wadaagno xirfadaha si wax ku ool ah, si loogu doodo baahida qoyskaga iyo ilmahaaga.

In aanu bixino taageero aan dhaliil lahayn iyo in aanu fahanno taageerada aad u baahantiin waalid ahaan.

Waxaad samaynkartaa

Nasoo wac si aad ula hadasho taageeraha qoyska- xukun lahaan, eed la'aan iyo qarsoodi dhamaystiran.

Raadi koxda taageerada waalidka iyo waxyaaha kale ee laga helo cinwaanka ah:

pleo.on.ca

613.321.3211 (Ottawa)

1.855.775.7005